

Minnesota Truth Council

Golaha Guddoomiyaha ee Diiwaangelinta Xaqiiqada
Hawlgalka Metro Surge iyo Hawlgalka PARRIS



The Advocates
FOR HUMAN RIGHTS

Waxaan rajaynaynaa inaan iskaashi la yeelanno ururkiinna. Xiriirrada aad la leedahay bulshada ayaa muhiim u ah sidii aan u gaari lahayn dadka ay tahay in sheekooyinkooda la maqlo.

WAXA KU SAABSAN GOLAHA

Hannaan Madax-bannaan oo Lagu Diiwaangelinayo Xaqiiqada

Golaha Xaqiiqada ee Minnesota waa gole madax-bannaan oo aan dhinac siyaasadeedna raacsanayn, kaas oo diyaarin doona diiwaan taariikheed oo dadweyne oo ku saabsan waayo-aragnimada badbaadayaasha iyo markhaatiyaasha, isla markaana soo saari doona warbixin ay ku jiraan talooyin ku saabsan dib-u-habaynta sharciyada iyo siyaasadaha.

Ururka The Advocates for Human Rights waa hay'adda fulinaysa hawlaha Golaha Xaqiiqada ee Minnesota.

Golaha wuxuu diiwaangelin doonaa labadaba xadgudubyadii xuquuqda aadanaha ee ka dhashay hawlgallada la xoojiyay iyo sida dadka reer Minnesota ay isu garab istaageen iyagoo muujiyay naxariis, geesinimo, iyo adkaysi.

Madax-bannaan

Aan dhinacna raacsanayn

Ku salaysan baahiyaha dhibbanayaasha

Daahfuran

Bulshada hogaaminayso

Kani ma aha maxkamad. Golaha ma laha awood uu ku dacweeyo, ku xukumo dembi, ku soo rogo ciqaab, ama ku bixiyo magdhow.

Ku Saabsan The Advocates for Human Rights Waa urur madax-bannaan oo u dooda xuquuqda aadanaha, xaruntiisuna tahay Minneapolis, lehna tobannaan sano oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan diiwaangelinta xaqiiqooyinka, caddaaladda xilliga kala-guurka, iyo dhismaha diiwaanka taariikheed ee lagama aarmaanka ah isla xisaabtanka.

SIDA URURRADA ISKAASHIGA LA LEH AY U CAAWIN KARAAN

Saddexda Door ee Muhiimka ah

1 Tababbaraan oo taageeraan ururiyayaasha sheekooyinka. Qoraan oo tababbaraan mutadawiciin ka socda bulshadaada si ay u ururiyaan sheekooyin iyagoo adeegsanaya hab ku salaysan wacyiga dhaawacyada maskaxeed (trauma-informed), kadibna ugu gudbiyaan Golaha Xaqiiqada. Tababbarka, agabka, iyo taageerada waxaa bixinaya The Advocates.

2 Ka caawiyaan dadka inay la wadaagaan sheekooyinkooda. Aqoonsadaan xubnaha bulshada ee doonaya inay si dadweyne ula wadaagaan wixii ay la kulmeen ama ay markhaati ka ahaayeen intii lagu jiray hawlgallada la xoojiyay. Dadka waxay dooran karaan inay sheekadooda si magac qarsoon ah u wadaagaan ama ay ku daraan magacooda. Ku xidh ururiyayaasha sheekooyinka ee ururkiinna ama kuwa Golaha Xaqiiqada. Xiriirrada kalsoonida leh ee aad bulshada la leedahay ayaa ah buundada ay dad badan ugu baahan yihiin inay si ammaan ah uga qaybqaataan.

3 Kobciyaan goobo ay bulshada si wadajir ah isugu timaaddo. Abaabulaan goobo bulsheed oo ay kooxuhu si wadajir ah ugu wadaagi karaan waayo aragnimadooda, si ay u xoojiyaan una dhammaystiraan habka qof walba uu sheekadiisa u wadaagayo.

JADWALKA MASHRUUCA

Bilowga May 2026

Ururinta sheekooyinka bulshada iyada oo loo marayo ururrada iskaashiga la leh

Xagaaga - Dayr 2026

Ugu yaraan afar kulan oo dadweyne oo ku saabsan mowduucyo la doortaythemes

Oktoobar 31, 2026

Natijjooyinka hordhaca ah iyo talooyinka

Diseembar 1, 2026

Warbixinta kama dambaysta ah waxaa loo gudbin doonaa Guddoomiyaha Gobolka, Golaha Sharci-dejinta ee Minnesota, iyo ergada Minnesota ee Kongareeska Mareykanka.



NOQO
LAMMAANE

Macluumaad dheeraad ah, iimayl ugu dir MNTruthCouncil@advrights.org.